# MA U MALAYNAYSAA IN CANUGAAGU QABO

# JADEECO?


## Waxa aad samaynayso hadaad u malayso in canugaagu jadeeco qabo

**Jadeecadu waxay inta badan ku bilaabataa qandho, qufac, sanka oo duuf ka socdo, iyo indhaha oo guduuta taasoo keenta finan. Haddii qof qoyskiina kamid ah leeyahay astaamaha jadeecada:**

**Ka fogee xubnaha qoyska** ee aan xanuunsanayn.

**Qof walba oo guriga jooga waa inuu guriga joogaa** si uusan xanuunka u qaadsiin dariska ama dadka dibadda jooga.


**Wac dhakhtar ama isbitaal islanarkiiba** si aad ugu sheegto in qof guriga jooga uu jadeeco la xanuunsanyahay. Waxay ku siin doonaan tilmaamo.




## Marka aad aadayso qaybta xaaladaha degdega ah

**Haddii xaalada qofka xanuunsan ay si dhakhso ah uga sii darto ama uu leeyahay wax kamid ah astaamaha hoose gee waaxda xaaladaha degdega ah ee isbitaalka islamarkiiba.**

**HA SUGIN.**



**Neefta oo dhibaysa**
(ama inuu u neefsanayo si ka badan sida caadiga ah)



**Xanuun marka uu neefsanayo ama qufacayo**



**Jirka oo qalala**
(sanka iyo afka oo qalala, kaadida oo ku yar, oohin aan illin lahayn)



**Qandho ama madax-xanuun aan kala joogsi lahayn**



**Jaah-wareer, dhiifoonaanta oo yaraata, ama tabaryari aad u daran**



**Afka geesihiisa oo buluug noqda, tamar yari, ama oomateed yari**
(caruurta yaryar)

**Qof u sheeg inuu waco intaadan imaan. U sheeg isbitaalka qofka la xanuunsan jadeecada inuu imaanayo.**

**U DIYAAR GAROW JADEECADA**
cdc.gov/measles